

Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

Bukaan kasta oo xaq u leh caawimaad lacageed oo hoos timaada Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee Children's Hospital Corporation d/b/a Boston Children's Hospital ("Isbitaalka), ee hela Adeegyada Degdegga ah ama Adeegyada kale ee Caafimaadka ee Muhiimka ah ee uu bixiyo Isbitaalku, laguma dallici doono lacag ka badan wadarta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ("AGB") ee bukaannada ku jira (a) caymiska caafimaadka/qorshooyinka gaarka loo leeyahay; (b) Kharashka adeegga ee Medicare; iyo (c) Medicaid.

Isbitaalku wuxuu go'aamiyaa boqolayda AGB iyadoo la adeegsanayo Qabka Raad-raaca (Look Back Method). Si sannadle ah, AGB waxaa loo xisaabiyaa iyadoo loo qaybinayo (i) wadarta dhammaan inta la oggol yahay ee sheegashooyinka ah in ay bixiyeen Medicaid, khidmadda adeegga ee Medicare iyo dhammaan caymisyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay, (ii) wadarta dadka la xiriira kharashka guud ee sheegashooyinkaas. AGB waxaa lagu dabaqi doonaa dheelitirka bukaanka, kadib marka la buuxiyo shuruudaha u qalmitaanka Kaalmada Dhaqaalaha, si loo go'aamiyo qadarka loogu talagalay.

Xisaabta AGB da Isbitaalka waxaa loo xisaabiyaa qaab sanadle ah, badanaa bisha Diseembar si loo helo macluumaadka ugu dhameystiran ee sheegashooyinka la bixiyay intii lagu jiray sanad maaliyadeedkii ka horreeyay oo ku eg 30-ka Sebteember. Isbitaalka wuxuu adeegsaday waxyaabaha soo socda si loo xisaabiyo AGB:

- Look Back Method.
- Muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo cabiraya sanad maaliyadeedkii ugu dambeeyay.
- Kharashka adeegga Medicaid, Medicare, iyo lacagaha caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay.

$$\text{AGB} = \frac{\text{Wadarta dhammaan Lacagaha La Oggol yahay ee Sheegashooyinka ee ay Bixiso Medicaid, Kharashka adeegga ee Medicare iyo dhammaan Caymisyada Caafimaadka Gaarka ah/Qorshooyinka Wadarta Lacagaha Guud ($) ee sheegashooyinkaas}}{}$$

Qadarka ay Guud ahaan Qofka lagu leeyahay FY2022: 54.0%

Dhaqan galaysa: Oktoobar 1, 2021